



Australian Government

Fair Work

OMBUDSMAN

Caawimada luqada

Waxaa jiri doona isbedel lagu samaynayo qaanuunka xiriirka shaqaalaha ee Australia laga bilaabo 1da Juulay 2009.

Qaanuunada cusubi waxay qeexayaan xuquuqda iyo waajibaadka ay leeyihiin dadka shaqeeyaa.

Isbedelku wuxuu khuseeyaa goobta shaqada ee Australia badankeed.

Xuquuqdaan qaarkeed iyo waajibaadka ayaa ah:

- waxa qofka shaqeeyaa qaadanayo
- xuquuqda fasaxa iyo xaallada shaqada
- diiwaanka looga baahan dadka loo shaqeeyaa inay xafidaan
- sida shaqaalaha iyo loo shaqeeyuhu caawimo ku helli karaan haddii dhibaato shaqada ka qabsato
- takoorid la'aan la xiriirta, tusaale ahaan jinsiga, nooca galmoodka qof ka hello, da'da, iinta maskaxeed ama jireed, ama xaallada guur.

Yaa caawimi kara?

Waxaa jira laba urur oo ku jira nadaamka cusub ee xiriirka shaqaalaha qaranka.

Waxayna yihiin Fair Work Commission iyo Fair Work Ombudsman.

Fair Work Commission waa maxkamada xiriirka shaqaalaha qaranka. Waa hay'ad madaxbanaan oo leh awooda ay ku fuliso hawla badan oo la xiriira:

- inta ugu yar oo mushahara oo la bixin karo iyo xaallada shaqada
- gorgortanka shaqada la qabanayo
- ficilka shaqada la xiriira
- xalinta khilaafka
- ka eryada shaqada
- Waxyaallaha kale ee la xiriira goobta shaqada.

Fair Work Ombudsman-ku:

- waxay bixisaa talo iyo waxbarasho la xiriirta qaanuunada goobta shaqada Australia
- waxay la socotaa sharciga iyo baarista qaanuunada la isku qabto ee goobta shaqada qaranka
- waxay daabacdaa macluumaadka xuquuqda goobta shaqada iyo waajibaadka
- waxay bixisaa aalladaha iyo macluumaadka ganacsiyada yaryar.

Ma u baahan tahay macluumaad intaas ka badan?

- La xiriir khadka macluumaadka ee Fair Work oo ah 13 13 94.
- Wixii la tarjumo, la xiriir Adeega Afcelinta iyo Tarjumida qoraalka (**Translating and Interpreting Service (TIS)**) oo ah **131 450** qiimaha halka aad joogto 24ka saacadood, 7da berri ee asbuuca.

Fair Work Infoline: 13 13 94 www.fairwork.gov.au